STAY SAFE MN

# Warqadda Macluumaadka Bukaanka ee Remdesivir (Veklury®)

Warqaddan macluumaad waxay ku saabsan tahay daawo loo yaqaan remdesivir (Veklury®). Remdesivir waxaa loo isticmaalaa in lagu daaweeyo cudurka koronafayras 2019 (COVID-19). Macluumaadkani waa inuu kaa caawiyo inaad fahamto faa'iidooyinka suurtagalka ah iyo khataraha suurtagalka ah ee daawadan.

## Ku saabsan remdesivir

Remdesivir waa daawo loo isticmaalo in lagu caawiyo in lagu daaweeyo dadka isbitaalka ugu jira COVID-19. Daawadan waxaa lala isticmaali karaa daaweynta kale ama daawayn kali ah, iyadoo ku xiran sida bukaanku u xanuunsan yahay.

Remdesivir si buuxda umay ansixin Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka ee Maraykanka (FDA) maxaa yeelay wali waa la baarayaa. Si kastaba ha noqotee, FDA waxay u oggolaanaysaa in la isticmaalo marka daraasado badan la sameeyay. Yurub iyo Jabbaan waxay sidoo kale adeegsanayaan remdesivir si ay ugu daaweeyaan COVID-19.

FDA waxay bixin kartaa oggolaansho degdeg si loo isticmaalo daawooyinka sida remdesivir inta lagu jiro xaaladaha degdegga ah ee caafimaad, sida faafitaanka adduunka ee COVID-19. FDA waxay siisaa oggolaansho degdeg ah marka daraasadaha hore ay u muuqdaan inay muujinayaan in daawada ay tahay mid ammaan ah oo waxtar leh. Oggolaanshahan waxaa lagu magacaabaa Oggolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah.

## Faa'iidooyinka suurtagalka ah ee remdesivir

Remdesivir ayaa laga yaabaa inay kaa caawiso inaad si dhakhso leh u fiicnaato haddii aad qabto COVID-19. Waxay yarayn kartaa inta jeermis ee jirkaaga ku jira. Daraasadaha, bukaannada la siiyay remdesivir ayaa si dhakhso leh uga bogsaday xanuunkooda. Hal daraasad, celceliska dhererka xanuunku wuxuu hoos ugu dhacay 15 maalmood illaa 11 maalmood. Remdesivir waxay caawin kartaa bukaannada dhammaan heerarka kala duwan ee COVID-19. Waxa kale oo laga yaabaa inay hoos u dhigto halista dhimashada ee ka timaadda COVID-19 haddii bukaanadu ay helaan daawada waqtiga hore ee xanuunkooda, kahor intaanay dhibaato ku noqon neefsashada iskood oo ay u baahdaan hawo-siiye.

## Khataraha suurtagalka ah ee remdesivir

Maaddaama remdesivir weli la baarayo, waxaa suurtagal ah in aanan weli wada ogayn dhammaan dhibaatooyinka soo raaca. Si kastaba ha noqotee, dad badan oo ku jira tijaabooyin caafimaad, iyo sidoo kale dadka deggan Minnesota, ayaa lagu daaweeyay remdesivir. Dhibaatooyinka ugu badan ee soo noqnoqda ee lagu sheegay daraasadaha waxay ahaayeen madax xanuun, lallabbo, heerarka potassium

ee hooseeya, khal-khalka enzymes-ka beerka, ama khal-khalka shaqada kelyaha. Waa suurtogal inaad ku yeelato xasaasiyad daawada, taas oo sababi karta cadaadiska dhiigga oo hooseeya, xiiq ama bararka bushimahaaga ama wejigaaga. Waqtigaan la joogo, waxtarrada Remdesivir waxay u muuqdaan inay ka culus yihiin halista waxyeellooyin kasta, laakiin dhakhtarkaaga ayaa si taxaddar leh kula socon doona inta aad dawada qaadanayso.

## Macluumaad intaa ka badan

Weydii dhakhtarkaaga wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan remdesivir. FDA waxay leedahay warqad xaqiiqeed faahfaahsan oo loogu talogalay bukaanada doonaya macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daaweynta. Waxaad weydiin kartaa bixiyahaaga warqadda xaqiiqda ee FDA. Xulashada daaweynta adigaa iska leh waxaadna joojin kartaa daaweynta waqti kasta haddii aad rabto.

## Bixinta Remdesivir ee Minnesota

Minnesota ayaa toddobaad walba ka hesha shixnadaha Remdesivir dowladda Maraykanka iyadoo lagu salaynayo tirada dadka ugu jira isbitaalka COVID-19. Isbitaalada gobolka oo dhan waxay iibsan karaan remdesivir halka Waaxda Caafimaadka ee Minnesota ay ka caawin karto isbitaalada inay helaan remdesivir, haddii loo baahdo. Go'aannada ku saabsan daaweynta remissivir waxay ku saleysan yihiin sida aad u xanuunsan tahay; kuma salaysna da'da, jinsiyadda, isirka, diinta, naafonimada, xaaladda caymiska, xaaladda muwaadinnimo, ama arrimo kale.

## Waxaa xiga ee la qabanayo

- Weydii dhakhtarkaaga dhammaan xulashooyinka daaweyntaada, oo ay ku jirto remdesivir.
- U sheeg dhakhtarkaaga dhammaan daawooyinka aad hadda qaadato.
- Xulo qof kaa caawin kara inaad gaarto go'aannada caafimaadka oo kuu hadli kara haddii aadan naftaada u hadli karin. Hubso in qofkaasi ogyahay waxa adiga muhiimka kuu ah.

## Ku saabsan COVID-19

COVID-19 waa cudur uu sababo fayras, oo loo yaqaan koronafayras, oo aan dadka horay looga helin. Tan iyo Diseembar 2019, fayraskan wuxuu ku faafay dalal badan oo adduunka ah, oo uu ku jirto Maraykanku. Waxaad ku qaadi kartaa COVID-19 adiga oo ku neefsada dhibcaha fayraska ee uu soo tuuray qof kale oo qaba fayraska. Dadka qaar ee qaba COVID-19 ma lahaan karaan wax calaamado ah. Dadka kale waxay qabaan xanuun aad u sahlan, sida hargabka oo kale. COVID-19 wuxuu kaloo dadka ka dhigi karaa kuwo bukooda in ku filan oo isbitaal lagu geli karo ama qaybta daryeelka degdegga ah.

MINNESOTA

Minnesota Department of Health | health.mn.gov | 651-201-5000
625 Robert Street North PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975

La xiriir health.communications@state.mn.us si aad u codsato qaab kale.

9/1/2020 (Somali)